



# Go'idda Korontada

Go'idda korontadu waxay keeni kartaa walaacyo ah xagga ammaanka oo dhawr ah; ogaanshaha macluumaadka soo socda ayaa ku gargaari kara.

## Ka hor go'idda korontada

- Qalabka nafta taageera iyo qalabka caafimaadka ka diiwaangali shirkaddaada korontada.
- Ku fikir inaad iibsato koronto-dhaliye. Marka aad rakibaysid koronto-dhaliye, si taxadir leh u raac fariimaha. Koronto-dhaliyuhu ha kuu yaalo dibadda oo xadhig gudaha u soo jiid. Koronto-dhaliyahaaga ha ku xidhan sanduuqa korontada gurigaaga laga maamulo — waa khatar! U hubso inaad gudaha guriga dhigatid qalabka digniinta kaarbon monoksaydh.
- U hubso in xidhmadaada u-diyaarsanaanta masiibada ay ku jiraan ullahe iftiinka, tooshash/karbuunooyin, raadyo ku shaqeeya baytari oo wata baytariyo dheeraad ah iyo saacad gacanta lagu duubo.
- Hayso teleefon leh xadhig —teleefonada aan xadhig lahayn ma shaqeyn doonaan marka korontadu go'do.
- Hayso qalab kulaylin oo beddel ah oo ammaan ah iyo shidaal kayd ah. Marna ha gubin dhuxul ama koronto-dhaliye ha ku isticmaalin gudaha.
- Haddii aad leedahay albaab-fure geeraash oo koronto ku shaqeeya, baro sida loo furo albaabka koronto la'aan.

## Marka korontadu go'do

- Dami nalalka iyo qalabka korontada ku shaqeeya marka laga reebo qaboojiyaha iyo barafeeyaha (freezer).
- Xiitaa haddii mugdi jiro, iswiiyada nalalka iyo barta laga daaro/damiyo faynuusyada korontada ku shaqeeya ama qalabka gee barta daminta (off).
- Kombiyuutarada iyo qalabka kale ee xasaasiga ah ka saar korontada ama dabka si looga badbaadiyo butaacid (surge) suurtoagal ah marka korontadu soo noqoto.
- Hal nal daa si aad u ogaatid marka korontadu soo noqoto. Sug ugu yaraan 15 daqiiqadood ka dib marka korontadu soo noqoto ka hor inta aanad daarin qalabka kale.
- Biyaha madhxi, gaar ahaan haddii aad isticmaashid biyo ceel.
- Marna kulaylinta gudaha guriga ha u isticmaalin foorno gaas ama naqas ku shaqeysa, shoolladaha gaas ku shaqeeya, baarbikiyuu ama kulayliyeyaal la qaadi karo ama ku shaqeeya “propane” — waxay isticmaalaan oksijiin waxana ay abuuraan kaarbon monoksaydh sababi karta neef-qabasho.

- Shumacyadu waxay sababi karaan dab. Waxa aad uga fiican in iftiin ahaan loo isticmaalo tooshash ama karbuunooyin ku shaqeeya baytariyo ama illaha iftiima.
- Kulayliyaha isticmaala kiroosiin, faynuus ama shoollad ku shaqeeya gaas oo aad gudaha guriga ku isticmaashid waxa uu noqon karaa halis. Samee hawo-saaris haboon wakhti kasta si looga baxsado qiiq sun ah oo urura, oo u hubso inaad haysatid qalabka digniinta kaarbon monoksaydh.
- Ka fogow khadadka korontada ee soo dhacay iyo dhirta liicaysa ee leh laamo jabay.

## Cuntada ammaan ka dhig

- Si taxadir leh u isticmaal oo u kaydi cuntada si looga hortago cudurada marka aan la heli karin qaboojin, korontada oo go'day daaraadeed.
- Ugu hor isticmaal cuntooyinka dhakhso u xumaada.
- Ha xidhnaadaan albaabada qaboojiyeyasha iyo barafeeyeyasha. Qaybta barafeynta ee qaboojiyahaagu waxa uu cuntada ka dhigi karaa baraf ilaa hal maalin. Barafeeye gooni ah oo buuxa waxa uu cuntada ka dhigi doonaa baraf ilaa laba maalmood.
- Istimmaal sanduuq baraf oo laga buuxiyay baraf adag (ice) ama barafka jilicsan (snow) si cuntadu u ahaato qabow. Soo iibso baraf qallalan (dry ice) si aad u badbaadisid cuntada barafeysan. Barafka qallalan ha ku qaban gacmahaaga oo qaawan. Istimmaal bulukeetiyo baraf ama baco baraf ah si aad u qaboojisid cuntada.
- Samee taxadir haddii aad cuntada ku kaydinaysid dibadda xilliga jiilaalka si aad u qaboojisid. Heerkulka dibaddu wuu is bedbedelaa, gaar ahaan marka qorraxdu jirto. Waxa laga yaabaa in cuntada barafowday dhalaasho oo cuntada ku jirta qaboojiyaha ay gaadho diirimaad oggolaanaya in bakteeriyadu badato. Cuntada lagu kaydiyo dibadda waa in laga ilaaliyo in xayawaanku wasakheeyo.
- Haddii aad ka shakisan tahay, iska tuur. Tuur hilibka, cuntada badda, caanaha iyo waxyaabaha caano ka sameysan iyo cuntada la kariyay ee aan qabow laga dareemaynin.
- Marna ha dhahamin cunto shaki leh. Xiitaa haddii cuntadu u muuqato mid fiican oo urteeduna fiican tahay, waxa laga yaabaa inay ku jiraan bakteeriyada cudur keenaysa.



PO Box 47890  
Olympia, WA 98504-  
7890

Bogga Internetka:  
[www.doh.wa.gov](http://www.doh.wa.gov)

360-236-4027  
(800) 525-0127

DOH Pub 821-030  
Somali